

Schlüsselworte in Somali

Xannaanada dhexdeeda waxaa la ilaaliyaa sharafta Bini'aadamka ta Carruurta iyo ta Dadka waawaynba. Cunug kasta oo Aduunka ku nool wuxuu leeyahay xuquuq:
Cunug kasta waa in uu helo xuquuqaha badbaadinta, tusaale ahaan Barbaarin dil la'aan ah, in uu xaq uleeyahay horumarka iyo ka qayb qaadashada. Xuquuqahaas waxaa sidoo kale Jarmalka lagu ilaaliyaa Dastuurka. Dawladuna waxay ilaalisaa kasoo bixidooda

Diiwaan galinta

- √ Intaan Xannaanada lagu qorin kahor waa in Qandaraaska Barbaarinta la isla galo
- √ Waxaa la ixtiraamayaa nolol dhaqameed/diimeed iyo dabeecadaha cuntada

Barbaarinta iyo hawlgalka Tababarka

- √ Hawlaha Xannaanada waa Waxbarashada, Barbaarinta iyo haynta;
- √ Qoridda Cunuga kadib waxaa si tartiib ah usoo dhawaynaya Barayaasha qaabilsan
- √ Lasocodka iyo caawitaanka uu Cunuga helayo iyo sida uu u korayo waamida ugu muhiimsan oo lala soconayo

Wada shaqaynta Waalidiinta

- √ Waalidiinta oo ah lamaanaha xagga Barbaarinta iyo shaqada waxbarashada
- √ Matalaadda Waalidiinta (Guddiga Waalidiinta)

Ka warhaynta

- √ Hadafka waxbarashada waa is xilqaamid iyo wada shaqaynta shakhsiyadeed
- √ Carruurta waxaa la barayaa sidii ay isugu filnaan lahaayeen iyo ficilka masuuliyadiisa
- √ Carrurtu ma'aha Xannaanada dhexdeeda kuwo marwalba la ilaalinayo.

Caymiska Shilka

- √ Waxaa jira Caymisyo Carruurta loogu talagalay wax kastooy qabanayaan (intay) Xannaanada joogaan
- √ Waxaa kaloo jira Caymis intay jidka Xannaanada ku sii socdaan iyo intay kasoo socdaamba

Imaanshaha maalinkasta/ Wakhtiyada furitaanka

- √ Mas'uuliyadda keenista iyo soo qaadista Cunuga waxaa leh Waalidiinta
- √ Haddi ay dhacdo in Shaqaaluhu imaanin waxaa isbadal ka imaan karaa wakhtiyada furitaanka, sidee markaas Walidiinta loo heli karaa?

Shaqaalaha ku takhasusay Xirfadda Tarabiyada

- √ kuwaasu waa kuwo shaqada Xannaanada u haysta shahaado aqoonsi ah
- √ Ka warhaynta Shaqaalaha Xannaanada waxaa haya Xannaanada maamulaha
- √ Ka warhaynta Maamulaha waxaa haya kuwa Xannaanada leh
- √ Shaqaala dhexdoodana waxay haystaan Xirfado kala duwan

Ilaalinta

- √ sidii loola dhaqmi lahaa waxyaabaha Carruurta khatarta u ah waa la nidaamiyay
- √ Waalidiintu waxay Xannaanada ka heli karaan xiriirinta muhiimka u ah caawitaanada ay u baahanyihiin

Schlüsselworte in Somali

Cuntada nadaafadeeda

- √ Habka nadaafadda (Keegaga, Ansalaatada soo siiyaan Waalidiinta) Macluumaadka ku saabsan habka loo diyaarinayo iyo habka loo cunayo Cuntada iyo Cabitaanka waxaad ka helaysaa Xannaanada.
- √ Carruurta xanuunsan (tusaale ahaan shubanka la isqaadsiiyo), kama qayb gali karaan hawlaha jikada/ mashaariicda

Carruurta xanuunsan

- √ Haddii uu Cunugu xanuunsanyahay waxaan idinka codsanaynaa in aad Xannaanada usoo sheegtaan
- √ Carruurta uu hayo cudurada la isku daarto, xataa injirta, ma banaana in ay Xannaanada yimaadaan sida uu tilmaamayo qodobka (§ 34 IfsG)
- √ Daawo waxaa Xannaanada lagu siin karaa kaliya, haddii uu dhakhtar amray marka laga reebo cudurada joogtada ah / sida Sokorta

Xogta ilaalinteeda

- √ Oggolaanshaha Waalidiinta marka la daabacayo Sawirada
- √ Duubidda iyo Sawirada laga qaado Waalidiinta xafladaha
- √ Sawirada iyo Filimada lama galinayo Internedka
- √ Oggolaanshaha wada shaqaynta Iskuulka

Tabarucaadka Waalidiinta

- √ Labo jirka ilaa bilaabidda Iskuulka dhigashada Xannaanada waa bilaa lacag
- √ Meelaha lagu hayo Carruurta sadex jir ka yar iyo kuwa Iskuulka gaaray
- √ Codsiga Xaafiiska sooshalka
- √ Lacagta cuntada Carruurta maalintiyoo dhan jooga

Ka bixidda

- √ Sababta aad u joojinaysid
- √ Looma baahna ka bixid iskuulka bilaabidiisa

√ **Hadda:** Desembar 2016

√ **Masuuliyadda:** LIGA FG Kita